

## **Amarka Ka Saarida ee Diiwaan La'aanta (Foomka Jaallaha)**

### **Maxay tahay warqaddan?**

Warqaddan waa ogeysiis sharci ah. Dugsiga ama xanaanada ilmaha ee cunuggaagu dhigto ma hayo diiwaanka tallaalka ee cunuggaaga. Waa inaad soo gudbiso diiwaanka Maalinta Ka Saarida ama cunuggaaga looma oggolaan doono in uu tago dugsiga ama xanaanada ilmaha ilaa diiwaanada laga cusbooneysiyo.

### **Maxay tahay inaad sameyso?**

➤ **Haddii aad heyso diiwaanka tallaalka cunuggaaga:**

U gee diiwaanka dugsiga ilmahaaga ama xannaanada ilmaha.

➤ **Haddii aadan lahayn diiwaan, laakiin cunuggaagu tallaalan yahay:**

Wac xafiiska dhaqtarka cunuggaaga ama ALERT IIS, diiwaanka tallaalka Oregon, adiga oo ka wacayo 1-800-980-9431. Marka aad diiwaanka hesho, u gee dugsiga cunuggaaga ama xannaanada ilmahaaga.

➤ **Haddii cunuggaaga aan la tallaalin:**

Ballan u qabso sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah si aad u hesho tallaalka. Ha ogaadaan in ilmahaaga laga soo diri doono dugsiga ama xannaanada ilmaha bilaa tallaalka. Haddii aadan dhakhtar lahayn, wac 211. Wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho rug caafimaad si aad u hesho tallaalka. Marka aad hesho diiwaanka tallaalka, hubi inaad nuqul siiso dugsiga ama xannaanada cunugga.

### **Ka waran hadduu dhaqtarku kuu sheego in ilmahaagu aan la tallaali karin?**

Oregon waxay oggolaataa ka-dhaafitaanka caafimaad. Waa qasab inuu saxiixaa dhaqtar ama waaxda caafimaadka deegaanka. Haddii aad u maleyneyso in cunuggaaga u baahanyahay ka-dhaafitaan caafimaad, la hadal bixiyaha daryeelka caafimaad ee ilmahaaga.

### **Ka waran haddii aad doorato in aan lagu tallaalin?**

Oregon waxay oggolaataa ka-dhaafitaanka aan caafimaadka ahayn. Si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo helo ka-dhaafitaanka aan caafimaadka ahayn, booqo [www.healthoregon.org/vaccineexemption](http://www.healthoregon.org/vaccineexemption).

### **Ka waran haddii aad su'aalo qabto?**

Wac waaxda caafimaadka deegaanka ee ku qoran ogeysiiska sharciga ah. Way kaaga jawaabi karaan su'aalaha aad qabto.